



Jamhuuriyada Somaliland

Golaha Wakiilada JSL



Warbixinta

Wax-qabadkii Golaha Wakiilada Sanadkii 2014-ka

Contact:-

Somaliland House of Representatives Building
Mobile:- +252-634425218 and +252-634424837

info@somalilandparliament.net

Visit the House Website www.Somalilandparliament.net or www.Somalilandparliament.com

Warbixinta Sanadkii 2014-kii ee Wax qabadka Golaha Wakiilada

Waxaan halkan idiinku soo gudbinay waxqabadka Golaha Wakiilada Sanadkii dhamaadey ee 2014ka oo ka kooban Mashaariicdii Sharci ee Goluhu Ansixiyay iyo kuwa dhaqan-galey, Masuuliyiintii la ansixiyay, Go'aanadii Goluhu gaadhey, Wixii Gudiyadu qabteen iyo waxyaabo kale.

1. Kal-fadhiyadii Golaha ee 2014ka:-

No.	Kal-fadhiga	Taariikhda
1.	Kal-fadhiigii 23 ^{aad}	21 Dec-2013 ilaa 17 Feb 2014
2.	Kal-fadhiigii 24 ^{aad}	03 May-2014 ilaa 23 June 2014
3.	Kal-fadhiigii 25 ^{aad}	09 August 2014 ilaa 30 Sept 2014
4.	Kal-fadhiigii 26 ^{aad}	22 Nov' 2014 ilaa 13 Jan 2015

2. Fadhiyadii ay Goleweynaha iyo Gudiyadu fadhiisteen:-

1.	Fadhiyada Goleweynuhu	63 Fadhi
2.	Fadhiyada Gudidda Joogta	13 Fadhi
3.	Fadhiyada Gudiyada kale	104 Fadhi
	Isugeyn	180 Fadhi

3. Mashaariicdii Sharci (Xeerar) Goluhu ka dooday:-

No	Xeerka	Taariikhdii
1.	Xeerka Komishanka HIV/AIDSka	02/01/2014
2.	Xeerka Xabsiyada Somaliland	31/05-01/06/2014
3.	Xeerka Komishanka HIV/AIDSka markii 2 ^{aad}	09/06/2014
4.	Xeerka Ganacsiga Hawlaha Baananka	23/08/2014
5.	Xeerka Hay'adda Dhowrida Tayada	14-15/09/2014
6.	Wax ka badalka iyo kaabista Xeerka Diiwaangalinta Codbixiyayaasha	20-27/09/2014
8.	Xeerka Ilaalinta Keymaha iyo Duur-joogta	07-08/12/2014

4. Xeerarkii Madaxweynaha u gudbey si uu u dhaqan-galiyo:-

No	Xeerka	Taariikhdii	Loo Gudbiyay
----	--------	-------------	--------------

1.	Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Diiwaangalinta Codbixiyayaasha Xeer Lr.37/2007	06/12/2014	Madaxweynaha
2.	Xeerka Xabsiyada Somaliland Xeer Lr. 65/2014	27/12/2014	Madaxweynaha
3.	Xeerka Assaaska Komishanka dib u-habeynta Shuruucda Xeer Lr. 66/2014	28/12/2014	Madaxweynaha
4.	Xeerka Assaaska Komishanka Xakameynta HIV/AIDSka Xeer Lr. 67/2014	29/12/2014	Madaxweynaha

5. Xeerarkii Golaha Guurtida ku maqnaa:-

1. Xeerka Hay'adda Dhowrista Tayada Xeer Lr.68/2014
2. Xeerka Ilaalinta Keymaha iyo Duur-joogta Xeer Lr.69/2014

6. Masuuliyiintii Qaran ee Golaha hor-yimi:-



No	Masuulkii	Warbixintii/ujeedadii ka hadley
1.	Md. Dr. Sacad Cali Shire Wasiirka W. Qorsheynta	Warbixin ku saabsan Development Fund
2.	Md. C/casiis Maxamed Samaale Wasiirka W. Maaliyada	Warbixin ku saabsan Khasnada Dawlada
3.	Md. Maxamuud Xaashi Cabdi Wasiirka W. Duulista iyo Hawada	Warbixin ku saabsan Xeerka Duulista Madaniga ah
4.	Md. Cabdi Cali Jaamac Agaasimaha Guud ee Komishanka HIV/AIDSka	Warbixin ku saabsan Xeerka Komishanka HIV/AIDSka
5.	Md. Xuseen Cabdi Wasiirka W.	Warbixin Macdanta iyo Tamarta iyo

	Macdanta iyo Tamarta	Shidaalka.
6.	Gudoomiyaha Komishanka Dib u-habeynta Shuruucda.	Warbixinta Xeerka Komishanka Dib u-habeynta Shuruucda.
7.	Md. Xuseen Axmed Aadan Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka	Warbixinta Xeerka Argagixisada
8.	Md. Xirsi X. Cali Xasan Wasiirka Wasaarada Madaxtooyada.	Warbixinta Xeerka Nidaamka Xukuumada.
9.	Md. Cali Maxamed Warancade Wasiirka Wasaarada Arrimaha Gudaha.	Warbixinta Xaalada Guud ee Arrimaha Gudaha Dalka
10.	Md. Axmed X. Cali Cadami Wasiirka Wasaarada Gashaandhiga	Warbixinta Xaalada Aminga iyo Difaaca Dalka.
11.	Kooxda ku bahoobey Arrimaha Deegaanka (Green Caucus Group)	Warbixinta Xeerka Ilaalinta Keymaha iyo Duur-joogta
12.	Md. Cabdicasiis Maxamed Samaale Wasiirka Wasaarada Maaliyada	Warbixinta Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2015ka
13.	Md. Maxamuud Aw Cabdi Ibrahim Hanti-dhowraha Guud ee Qaranka	Warbixinta Xisaab Xidhada Miisaaniyadaha 2012kii iyo 2013kii

7. Ansixintii Odoroska Miisaaniyadii Qaranka ee 2015kii:-

Wasaarada Maaliyadu waxay Odoroska Miisaaniyada 2015ka u soo gudbisay Golaha Wakiilada 11/09/2014, iyadoo Wasaarada Maaliyadu saddexdii sano ee ugu dambeysay Golaha ku horkeentay Miisaaniyada intaan la gaadhin Bisha December.

Haddaba, Wasiirka Maaliyada oo ay Waheliyaan Masuuliyiinta ugu sareysa Wasaaradaasi sida Wasiiru-dawlaha Wasaarada Maaliyada iyo Agaasimaha Guud, waxay Warbixin Golaha ka siiyeen Miisaaniyada 2015ka 30/11/2014, iyadoo Miisaaniyadaasi ay aheyd lacag dhan **1,080,000,000,000/= S1 Sh**, oo u dhiganta dollar ahaan **\$ 180,000,000 (boqol iyo sideetan Milyan oo dollar)** waxayna Miisaaniyadii sanadkii ka horeeyay 2014ka oo aheyd **\$152,000,000 (boqol iyo konton iyo laba Milyan oo dollar)**, ay ka badneyd lacag dhan **\$28,000,000 (sideed iyo labaatan milyan oo dollar)**.

Sida shaxdan hoose ka muuqata Miisaaniyada 2015ku waxay ka kooban tahay:-

NO	Hay'adda	SLSH	Dollar
1.	Dawladda Dhexe	1,080,000,000,000	\$180,000,000
2.	Hayadaha Madaxa Banaan	176,846,392,352	\$29,474,399
3.	Dawladdaha Hoose	164,877,744,867	\$27,479,624
4.	Dakhliga Deeqaha caalamiga ah(Denmark& Britain)	85,800,000,000	\$14,300,000
	Isugeyn	1,507,524,137,219	\$251,254,023



Warbixinta Wasiirka ka dib, waxay Gudidda Dhaqaalaha oo sida Sharciga ah loo gudbiyay Miisaaniyadaas markii Wasiirku Warbixinteedii jeedisay, iyadoo Gudidda Dhaqaaluhuna ay Golaha u soo gudbiyeen Warbixintoodii Goleweynaha Fadhiigii 13^{aad} ee kal-fadhiga 26^{aad} ee taariikhdu aheyd 14/12/2014 waxaana isla fadhigaas Mudanayaashu Su'aalo ka Waydiiyeen Wasiirka Wasaarada Maaliyada Odoroska Miisaaniyada 2015ka.

Fadhiigii xigey oo ku beegnaa 15/12/2014kii wuxuu Goluhu uu Duuduub ku ansixiyay Odoroska Miisaaniyadii Qaranka ee 2015kii oo aan laga doodin sidii caadadu ahaan jirtey, waxayna Cod Aqlabiyad oo ay 39 Mudane gacan taag ku ansixiyeen Miisaaniyadaas iyadoo aaney cid diidey jirin, saddex Xildhibaan ka aamuseen, sidaasna Goluhu ku ansixiyay Miisaaniyadii sanadkaas oo Odoroskeeda dakhli ahaa lacag dhan (**1,080,000,000,000/= SI Sh**).

8. Xeerarkii Golaha horyaal ee Qabyada ah:-

No.	Magaca Xeerka	Cida Gacanta ku haysey
1.	Xeerka Duulista Madaniga ah.	Goleweynaha
2.	Wax ka badalka Xeerka Booliiska.	Goleweynaha
3.	Xeerka Hay'adda Dhowrida Tayada.	Guurtida ka soo noqdey
4.	Xeerka Ilaalinta Keymaha iyo Duurjoogta.	Guurtida ka soo noqdey
5.	Wax ka badalka Xeerka Xabsiyada.	M/weynaha ka soo noqdey
6.	Wax ka badalka Xeerka Assaaska Komishanka Dib u-habeynta Shuruucda.	M/weynaha ka soo noqdey
7.	Xeerka Midaynta Cashuuraha.	Gudidda Dhaqaalaha
8.	Xeerka Caymiska Qaranka	Gudidda Dhaqaalaha
9.	Xeerka Low of Establishment of Somaliland	Gudidda Dhaqaalaha

	Agency	
10.	Xeerka Ganacsiga Hawlaha Baananka	Goleweynaha (Ad hoc Committee)
11.	Wax-ka bedelka iyo Kaabista Xeerka Ciqaabta guud	Gudidda Garsoorka iyo Cadaalada
12.	Xeerka Kufsiga iyo dambiyada Galmada (rape bill)	Gudidda Garsoorka iyo Cadaalada
13.	Xeerka Shaqaalaha Dawladaha Hoose	Gudidda Arrimaha Bulshada
14.	Xeerka Saxaafada	Gudidda Arrimaha Bulshada
15.	Xeerka Ciyaaraha	Gudidda Arrimaha Bulshada
16.	Xeerka Waxbarashada	Gudidda Arrimaha Bulshada
17.	Xeerka Macdanta (Miniral Act)s	Gudidda Deegaanka iyo kheyraadka Dabiiciga ah
18.	Xeerka shidaalka (patroleum Act)	Gudidda Deegaanka iyo kheyraadka Dabiiciga ah
19.	Xeerka ka hortaga Argagixisada	Gudidda Arrimaha Gudaha
20.	Xeerka Nidaamka Xukuumada.	Gudidda Joogta iyo Anshaxa
21.	Wax ka badalka iyo kaabista Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada	Gudidda Joogta iyo Anshaxa

9. Masuuliyiintii Qaran ee Goluhu Ansixiyay:-





No.	Magaca iyo Xilka Masuulka la Ansixiyey	Xilka Masuulka	T/la ansixiyey
1.	Mr. Foosi Maxamed Cali	Xubin Gudidda Cadaalada Qaranka	18/01/2014
2.	Mr. Yuusuf Cabdi Aadan	Xubin Gudida Xuquuqal Insaanka ah	18/01/2014
3.	Md. Muuse Qaasim Cumar	Wasiirka Ganacsiga	18/08/2014
4.	Md. Cali Maxamed Cilmi	Wasiir ku-xigeenka Amniga	18/08/2014
5.	Md. C/kariim Axmed Mooge	Wasiir ku-xigeenka Kaluumeysiga	18/08/2014
6.	Md. Cali Xaamud JIbriil	Wasiirka Xidhiidhka Golayaasha, Cilmi baadhista iyo Technologyga	30/08/2014
8.	Md. Siciid Cali Muuse	Xubin Komishanka Doorashooyinka	29/11/2014
9.	Md. Maxamed Jaamac	Xubin Komishanka	29/11/2014
	Maxamed	Doorashooyinka	

10.	Md. Maxamuud Jaamac Waceys	Xubin Komishanka Doorashooyinka	29/11/2014
11.	Marwo. Kaltuun Sh. Xasan Cabdi	Xubin Komishanka Doorashooyinka	29/11/2014
12.	Md. C/qaadir Iiman Warsame	Xubin Komishanka Doorashooyinka	29/11/2014
13.	Md. C/fatax Ibrahim Xasan	Xubin Komishanka Doorashooyinka	29/11/2014
14.	Md. C/raxman Cisman Adam	Xubin Komishanka Doorashooyinka	29/11/2014

10.Go'aamadii Goluhu Gaadhey Sanadkaas:-

No.	Go'aanka	Taariikhda la gaadhey	Halka loo gudbiyay
1.	Go'aanka ansixinta Mr. Foosi Maxamed Cali xubin Gudidda Cadaalada	18/01/2014	Madaxweynaha
2.	Go'aanka ansixinta Mr. Shariif Ibraahim Cumar Xubin Gudidda Cadaalada	18/01/2014	Madaxweynaha
3.	Go'aanka ansixinta Mr. Yuusuf Cabdi Aadam Xubin Komishanka Xuquuqal insaanka ah	18/01/2014	Madaxweynaha
4.	Go'aanka ansixinta Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada JSL	08/02/2014	Shir-gudoonka
5.	Go'aanka ansixinta Ajendaha Kal-fadhiga 24aad	10/04/2014	Shir-gudoonka
6.	Go'aanka ansixinta Xeerka Xabsiyada	03/06/2014	Golaha Guurtida
7.	Go'aanka ansixinta Xeerka Komishanka Dib u-habeynta Shuruucda	21/06/2014	Golaha Guurtida
8.	Go'aanka ansixinta Ajendaha kal-fadhiga 25aad	16/08/2014	Shir-gudoonka
9.	Go'aanka ansixinta Md. Cali Maxamed Cilmi Wasiir ku-xigeenka Amniga	18/08/2014	Madaxweynaha
10.	Go'aanka ansixinta Md. Muuse Qaasim Cumar Wasiirka Wasaarada Ganacsiga	18/08/2014	Madaxweynaha
11.	Go'aanka ansixinta Md. C/kariim Axmed Mooge Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Kaluumeysiga	18/08/2014	Madaxweynaha
12.	Go'aanka ansixinta Md. Cali	30/08/2014	Madaxweynaha

	Xaamud Jibriil		
13.	Go'aanka ansixinta Xeerka Komishanka Xakameynta HIV/AIDSka	06/09/2014	Golaha Guurtida
14.	Go'aanka ansixinta Go'aan Gole oo laba qodob ah	30/09/2014	Madaxweynaha, Golaha Guurtida, Komishanka Doorashooyinka
15.	Go'aanka Ansixinta Xeerka Gudidda Hay'adda Dhowrida Tayad	16/09/2014	Golaha Guurtida
16.	Go'aanka ansixinta Ajendaha kal-fadhiga 26aad	25/11/2014	Shir-gudoonka
17.	Go'aanka ansixinta Xubnaha Komishanka Doorashooyinka Qaranka	29/11/2014	Madaxweynaha
18.	Go'aanka ansixinta wax ka badalka iyo kaabista Xeerka Diiwaangalinta Codbixiyayaasha Xeer Lr. 37/2007	06/12/2014	Madaxweynaha
19.	Go'aanka Ansixinta Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee 2015ka	20/12/2014	Madaxweynaha
20.	Go'aanka Ansixinta Xeerka Xabsiyada Somaliland	27/12/2014	Madaxweynaha
21.	Go'aanka Ansixinta Xeerka Komishanka Dib u-habeynta Shuruucda	28/12/2014	Madaxweynaha
22.	Go'aanka Ansixinta Xeerka Komishanka Xakameynta HIV/AIDSka	29/12/2014	Madaxweynaha

11. Fadhiyada Wadajirtka iyo Khudbad Sanadeedkii Madaxweynah:-

07 May 2014kii ayay labada Aqal ee Baarlamaanka (Guurtida iyo Wakiilada) Somaliland waxay fadhi wada jir ah ku dhageysteen Khudbad Sanadeedkii Madaxweynaha Md. Axmed Maxamed Maxamud Siilaanyo, khudbadaas oo Dastuuri ah in Madaxweynahu sanadkasta kal-fadhiga ugu horeeya laba Gole ka jeediyo.

Fadhigan oo ka dhacey aqalka Golaha Guurtida oo Gudoominayay Gudoomiye ku-xigeenka laad ee Golaha Guurtida **Md. Siciid Jaamac Cali** waxa ka soo xaadirey 105 mudane oo ka mid ah 164 Mudane ee ka kooban yihiin labada Gole ee Baarlamaanka Somaliland.



Khudbada Madaxweynaha oo aad u balaadhneyd waxaa ka mid ahaa waxyaabaha ugu muhiimsanaa ee uu kaga hadley dhinacyada:- **Amaanka, Siyaasada Arrimaha Dibada, Dhaqaalaha, horumarka ay xukuumadu ka sameysay Arimaha Bulshada.**

12. Waxqabadkii Gudiyada Golaha Wakiilada ee Sanadkaas:-

Gudida ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka ee Golaha Wakiiladu waxay noqdeen sanadkan 2014 gudidii ugu waxqabadka Badnayd ee golaha waxaanay sameeyeen kulanadii iyo kormeeradii ugu badnaa, taas oo ay guddidu markii ugu horaysay taariikhda golaha ka soo saareen warbixin dheer oo 36 Bog ah isla markaana ka soo talo bixiyeen.

Sidoo kale waxay gacanta ku hayeen qorista warbixin Hay'addaha Dawlada ee ay la qaateen kulamada, waxaanay sanadkaas 2015 kal-fadhigii ugu horeeya ku soo bandhigeen Natijadii kulamadaas iyo nuxurka warbixin ka koobneyd Hab-maamulka, ku dhaqanka sharciga iyo wax isdaba-marimaha ka jirtey Hay'adahaas.

Masuuliyiinta Hay'addaha ay Gudidda Ilaalinta iyo Daba-galka Hantida Qaranku la kulamada la yeelatey waxay kala ahaayeen kuwan:-

- **09/01/2014** Waxay kulan la yeelatey Xisaabiyaha Guud ee Qaranka **Md. Maxamed Cabdi (Badde).**
- **09/01/2014** waxay kulan la yeelatey Hanti-dhowraha Guud ee Qaranka **Md. Maxamuud Aw Cabdi (M.Dheere).**
- **15/01/2014** Waxay kulan la yeelatey Maareeyaha Wakaalada Biyaha Hargeysa **Md. Ibraahim Yoonis.**
- **15/01/2014** Waxay kulan la yeelatey Gudoomiyaha Gudidda Qandaraska Qaranka **Md. Aadan C/laahi Xasan.**
- **29/01/2014** Waxay Kulan la yeelatey Maareeyaha Televisionka Qaranka **Mr. Khadar Cali Gaas.**

- **30/01/2014** Waxay la kulantey Gudoomiyaha Hay’adda Shaqaalaha **Md. Nuux Sh. Muuse Ducaale**.
- **30/01/2014** Waxay Gudiddu Xafiiskeeda kulan kula yeelatey Maareeyaha Hay’adda Korontada.
- **09/07/2014** Gudidu waxay kulan la yeelatay Gudoomiyaha Baanka dhexe JSL **Md. Cabdi Siciid Dirir** Waxaanu gudida uga waramay sida ay ula dagaalamaan sixir bararka iyo nidaamka shaqo ee baanka.
- **22/06/2014** Waxay Gudiddu Kormeer Shaqo ku tagtey Airportka Eigal International waxay ku soo kormeereen Xarunta Cusub ee Wasaarada Duulista iyo Hawada Somaliland iyo guud ahaan Wasaarada, Gudida oo ay u qorshaysnayd inay Madaarka iyo Wasaaradaba u kuur galaan sida shaqada uga socotay isla markaana ay masuuliyiinta is xog waraystaan ayaanu gebi ahaanba u suuragelin ka dib markii wasiirka wasaarada Duulista iyo Hawada Maxamuud Xaashi Cabdi uu gudida ku wargeliyey inuu ku mashquulsanaa hawlo qaran isla gudida ka codsaday inay mar kale u soo noqdaan oo kulan kale uga dhigaan.
- Gudiddu sidoo kale waxay kulan la yeelatey Wasiirka Macdanta Iyo Tamarta Somaliland Md. Xuseen Cabdi Ducaale (Guray), Wasiirka ayaa warbixin tafatiran oo ku saabsan shaqada ay Wasaaradiisu Qaranka u hayso u jeediyey gudida warbixintaas oo isugu jirtay Tamarta, Macdanta Iyo Batroolka Dalku halka ay marayso.
- **20/08/2014** iyo **09/09/2014**, Waxay Gudiddu kulan la yeelatey Wasiirka Wasaarada Arimaha Gudaha **Md. Cali Maxamed Warancade**.
- **24/08/2014** Waxay Gudiddu kulan kula yeelatey Hay’adda Maamul Wanaaga, waxaanay uga warbixiyeen shaqada ay hayaan sida ay u shaqeeyaan iyo habmaamulkooda dhaqaale iyo maamul labadaba, Maamulka komishanka ayaa u soo gudbiyey gudida warbixinihii ugu badnaa ee ilaa hada gudida soo gaadhay waxaanay gudidu komishanka Maamul-wanaaga kala kulmeen wadashaqayn dhow iyo xog isdhaafsi.
- **15/09/2014** Waxay Gudiddu mar labaad kulan xafiiskeeda ka dhacey la yeelatey Gudoomiyaha Hay’adda Shaqaalaha Dawlada JSL **Mr. Nuux Sh. Muuse**. Kulankaas oo Gudiddu Gudoomiyaha waydiisay su’aalo ku saabsan shaqada uu qaranka u hayo.
- **13/09/2014ka** kulan ay la yeeshaan Maareeyaha Madbacada Qaranka JSL iyo ku-xigeenkiisa kulankaas oo ay Gudiddu Kaga xogwaraysteen, waxayna weydiiyeen warbixin ay hore ugu soo gudbiyeen gudidda waxaanay ka waydiiyeen su’aalo ku saabsan warbixintaas iyo galdaloolooyin Madbacada qaranka ay ka dareemeen Xubnaha gudidani.

- **06/09/2014** Kulan Xog waraysi oo ay guddidu la yeelatay Wasaarada Caafimaadka taas oo Wasiirkii u soo diray Agaasimaha guud ee Wasaarada Caafimaadka **Dr. Cismaan Xuseen Warsame** iyo laba sarkaal caafimaad, Agaasimuhu wuxuu Gudidda ku wareejiyey warbiximihii sanadlaha ahaa ee wasaarada, waxaanay ka xaal warameen Wasaarada Caafimaadka shaqadeeda iyo sidey hawlaha qaranka u hayaan iyo horumarka ay sameeysey. Waxaanay guddidu su'aalo ka waydiisay shaqadaas ay qaranka u hayaan Wasaaradu.
- **21/08/2014** Waxay kulan la yeelatay Mayorka Magaalada Hargeysa ahna Gudoomiyaha Golaha Deegaan Hargeysa Iyo Gudoomiyaha Mayorada Degmooyinka Dalka **Mr. Cabdiraxman Maxamuud Caydiid (SOLTELCO)** oo uu wehelinayay Xildhibaan Iliyaas oo isna ka tirsan golaha deegaanka Caasimada.
- **23/08/2014** Sidoo kale waxay Guddidu la kulmeen Mayorka Degmada Gebilay, Mayorka ayaa Gudidda uga warbixiyey waxqabadkii Mudadii ay joogeen wadooyinka ay dhiseen sida ay u qorsheeyeen xashiish gurista iyo hay'adaha kala duwan ee kala shaqeeya, qalabka ay u soo iibiyeen mudadii ay joogeen iyo qorshayaashooda mustaqbal.
- Guddidu waxay bishii **September 2014** kulamo kala gaar gaar ah la yeesheen Madaxda ugu saraysa hay'addaha UNDP, UNICEF iyo WHO waxaanay warbixino kaga dhegeysteen saraakiishaas Caawimooyinka ay wasaaradaha iyo Hay'adaha dawliga ah ee ay la shaqeeyaan siiyaan iyo sida wada shaqayntoodu tahay. Waxay guddidu wax ka waydiiyeen mashaariic gaar gaar ah iyo sida ay ugu qanacsan yihiin wad shaqaynta ay hay'adahaas la leeyihiin.
- **01-07/11/2014ka** Waxay Guddidu Kormeer ku tagtey Goboladda iyo Degmooyinka Dalka oo kala ah Gobolka Awdal, Gabiley, Saaxil iyo Tog-dheer, waxayna intii ay ku jireen safarkan Gobolada ay Kulamo kala la yeesheen, Badhasaabada Goboladaas, Isuduwayaasha iyo laamaha Hay'addaha Dawladu Gobolada ku leeyihiin, Golayaasha Deegaanka iyo Maamulada ilaha Dhaqaalaha sida Kastamada, Dekada Berbera iyo Maamulka Haamaha Shidaalka Berbera.
- Iyadoo ay tahay markii ugu horaysay ee ay Guddidu sidan xawliga ah u shaqeeyaan waxay Golaha soo hordhigeen warbixino ku saabsan Wixii ka soo baxay iyo Waxay kala kulmeen kulamadii ay Masuuliyiintaas Wasaaradaha/Hay'addaha kala duwan la sameeyeen iyo Kormeeradii Gobolada Dalka ay ku soo mareenba.
- Warbixinadaas ay Guddidu diyaarisay ayaa saamayn taban oo xaga horumarka iyo siday u shaqeeyaan ah ku yeelatay dalka gaar ahaan Wasaaradaha/Hay'addaha kala duwan ee Qaranka JSL.
- **1/06/2014** Kulan uu Gudoominayay Gudoomiye ku-xigeenka Gudida ayaa waxay Guddidu kaga-wada hadleen qaylo dhaan kaga timi dawladda Hoose ee dalka kuwaas oo si rasmiya iyo si aan rasmi

ahaynba loogu soo gudbiyey in musuqmaasuq xadhekaha goostay ka jiro, Gudidu falanqayn iyo wax iska waydiin ka dib waxay isku afgaratay inay safarkoodii hore u qorshaysnaa soo dedejiyaan si ay xaaladahan wax uga ogaadaan, intaa ka dib Gudidu warqad rasmiya ayay u qoreen shirgudoonka si ay ugala hadlaan suuragalmada safarkoodan.

13. Guddiyadii Gaarka ahaa (Ad hoc Committees) ee la saarey:-

Gudidii Gaarka aheyd ee loo saaray Wax ka badalkii Xeer-

hoosaadka Golaha Wakiilada:-

Waxa **04/01/2014** Gudi gaar ah loogu soo saarey Wax ka badalka Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada sida lagu Ansixiyay Qorshihii Hiigsiga Golaha Wakiilada Gudidaas oo ka kooban:-

1. 3 shir-gudoon ee Golaha
2. 8 Gudoomiye Gudi ee Golaha
3. Md. Baar Siciid Faarax
4. Md. Cabdi Maxamed jaamac
5. Md. Cali Sh. Ibraahim Aareye
6. Md. Xamze Maxamed Gaadaweyne

Gudidii ka soo talo-bixinta isku deygi Dil ee Md. Qabile:-

Waxa Gudi Gaar ah loo saarey **29/12/2013** isku daygi dil ee Xildhibaan Maxamed Faarax Qabile si ay uga soo talo-bixiyaan waxayna Gudiddaasi ka koobneyd Xubnahan soo socda:-

1. Md. C/raxman Maxamed Jaamac
2. Md. Ibraahim Jmac Cali (Rayte)
3. Md. Maxamed Saalax Cige
4. Md. Xamse Maxamed Gaadaweyne
5. Mr. Mustafe Maxamed X. Dahir (Lataliyaha sharcigaa)

Gudidii ka soo talo-bixinta Xeerka Komishanka HIV/AIDSka:-

1. Md. C/raxmaan Maxamed Jaamac (Xoog)
2. Md. Ibraahim Caraale Cabdi
3. Md, Xassan Muuse Hufane
4. Md. C/raxmaan Maxamed Jaamac
5. Mr. Mustafe Maxamed X. Dahir (Lataliyaha sharcigaa)

Waxaa markii labaad Gudi loo saarey ka soo talo-bixinta Xeerka Komishanka HIV/AIDSka:-

1. Md. Cali Maxamed Aadan (Cali Barre)
2. Md. Axmed Cabdi Nuur (Kijaandhe)
3. Md. Axmed Xasan Aadan (Weyso cade)
4. Md. Siciid Warsame Ismaaciil
5. Md. Ibraahim Axmed Heybe
6. Mr. C/risaaq Siciid Ayaanle

Gudidda Gaar ah (ad hoc committee) loo saarey Xeerka Ganacsiga Baananka 23/08/2014:-

1. Md. Siciid Maxamed Cilmi.
2. Md. Ibraahim Caraale Cabdi
3. Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf

4. Md. Maxamud Axmed Obsiiye
5. Md. Maxamed Xuseen X. Ciise

14. Aqoon korodhsiyo iyo Tababarada:-

Workshop:-15/June/2014 kulan aqoon korodhsi ah loogu qabtay Xarunta Golaha wakiilada JSL labada guddi hoosaad ee kala ah (Gudidda Ilaalinta iyo Daryeelka Hantida Qaranka iyo Gudidda Dhaqaalaha Maaliyada iyo Ganacsiga) kulankan oo ay goob joog ka ahaayeen 9 xubnood oo ka kala tirsan labadaas guddi iyo Muwaadin reer Somaliland ah oo ka tirsan Wasaarada Maaliyada ee dalka Sweden Lana yidhaahdo **Mr. Caydaruus Adan** oo ku takhasusay muddo dheerna ku shaqaynayay sida public Finance ka loo daba galo ee loo xisaabiyo.



Waxa muwaadinkan oo si mutadawacnimo ah guddiyadan aqoontiisa ugu taburacay xubnaha labadan guddi u jeediyey Lecture sida Hantidhawrkii u shaqeeyo caalamiyan iyo sida baarlamaankii dawlada ula xisaabtamo xaga maamulka dhaqaalaha isla markaana Hantidhawrkii uu ka madax banaanaadaa Xukuumada dhaqaale ahaan iyo maamul ahaanba.

Xubnahan Labada guddi isugu jira ayaa markay kulankan dhamaysteen waxay kulan gaara la galeen Gudoomiyaha Golaha Wakiilada **Cabdiraxmaan Maxamed Cabdilaahi (Cirro)**, isla markaana ay u gudbiyeen talooyin ku saabsan miisaaniyada, la xisaabtanka dawlada, shaqada Hantidhawrka iyo talooyin kale oo ku saabsan sharciyada lagu maamulo dhaqaalaha dawlada.

03/08/2014 waxa aqoon korodhsi soconayay 3 Casho loogu qabtay Shaqaalaha Golaha Wakiilada kaas oo ka dhacey Xarunta Golaha Wakiilada, Aqoon korodhsigaa oo ay soo qaban qaabisey Hay'adda AWEPA oo Golaha la shaqeysa waxaa Bixinayay Mr. ---- oo ah la taliyaha Madaxaweynaha Dalka Kenya, aqoon korodhsigan oo socday saddex maalmood waxaa Shaqaalaha lagu tababarey Shaqada Waaxyaha Baarlamaanka sida:-Shaqada Waaxda Shaqaalaha

11-12 October 2014 Waxa loo qabtay tababar socday laba cisho shaqaalaha Golaha Wakiilada ee Gobolada dalka iyagoo ku baranayey casharo la xidhiidha waajibaadkooda iyo mas'uuliyadooda shaqo.

Tababarkaas ayaa ahaa kii ugu horeeyey ee ay qaateen tan iyo markii ay si rasmi ah ugu hawlgaleen xafiisyadda gobolada ee dalka, tababarkan bixinayay khabiir ku xeel dheer arrimaha baarlamaanka **Mrs Soulef** iyo

qaar ka tirsan mas'uuliyiinta sarsare ee shaqaalaha Golaha Wakiilada oo ugu horeeyo Xoghaya Guud **Mr Abdirisaaq Siciid Ayanle**, Agaasimaha Qorshaynta Mudane Abdinasir Osman Mohamoud iyo lataliyaha Sharciga Mudane Mustafe Mohamed H. Dahir.



waxayna Shaqaalaha Goboladu ku barten casharo faa'iido leh oo la xidhiidha shaqada Barlamaanka (Parliament business), mudadii labada cisho ahaa ee uu socday ayaa wuxuu u dhacaayay si habsami ah, waxaana ka muuqatay shaqaalaha diyaargarow fiican.

Tababarkaas oo gacan wayn ka gaysatay suurto-galnimadiisa iyo qabsoomidaba hay'adda UNDP, waxaana Shaqaalaha markuu tababarkii u dhamaadey la siiyay Shahaadooyin uu Gundoonsiiyay Xoghaye ku-xigeenka **Mr. Jamaal Jaamac Jiir**.

Waxaa 23 ilaa 25 December 2014 kulan Culimiyeed shir wadatashi ah oo ku saabsan **qabyo qoraalka Xeerka Nidaamka Xukuumada Gudidda Joogtada iyo Anshaxu ku qabatey Hotel Ambassador**. Waxa ka soo qeyb-galey, Wasaaradaha Dawlada iyo Hay'addaha Dawlada, Garyaqaanada Iyo Aqoonyahanada iyo sidoo kale Bulshada Rayidka Ah, kulan cilmiyeedkaas oo socdey muddadaa sadexda cisho waxaa laga dooday laguna falan-qeeyay Qabyo Qoraalka Xeerka Nidaamka Xukuumada kaasi oo ay mas'uulkayihiin gacanta ku hayaan Guddida Joogtada iyo Anshaxa ee Golaha Gakiilada ka hor intaan loo gudbin goleweynaha.



Kulan Cilmiyeedkaas oo uu Furay Gudoomiyaha Golaha Wakiilada Md. C/raxman Maxamed C/laahi (Cirro), waxaana Furitaankaas sidoo kale ka hadley Gudoomiyaha Guddida Joogtada iyo Anshaxa Md. Buubaa, Garyaqaanka Guud ee Qaranka iyo Gudoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha.

15. Xafiisyadda Goluhu ka furtay Gobolada Dalka:-

Golaha Wakiiladu waxay xafiisyo ka furteen dhamaan Gobolada Dalka marka laga reebo Caasimada oo ay Xarunta Golaha Wakiiladu ay ku taalo. Xafiisyadaas oo dhamaantood Hay'adda **UNDP** gacan ka siisay kana caawisay qalabayntooda.

❖ Xafiiska Gobolka Awdal:-



Taariikhdu markay ahayd

17/03/2014 Guddida Joogtada & Anshaxa oo uu hogaaminayo Gudoomiyaha Guddida Joogtada ah ee G/Wakiilada **Md. Mahdi Ibrahin Buubaa** Waxay xafiis cusub ka fureen Gobolka Awdal oo noqday Gobolkii ugu horeeyay ee laga furo xafiis isku xidhi doona Mudanayaasha Golaha wakiilada ee laga soo doortay Gobolka Awdal iyo dadweynihii soo doortay.

Waxa xafiiskaas lagu qabtay xaflad lagaga hadlayo mihiimada xafiiskani u leeyahay dadweynaha Reer Awdal oo noqonaysa inay kula kulmaan Masuuliyiinta ay soo doorteen, wixii talo iyo tussaale ahna ku soo kordhiyaan. Sidoo kale, Badhasaab ku xigeenka, Maayirka xigeenka Gobolka Awdal iyo Guddida Joogtada ee Golaha Wakiiladu waxay si wadda jir ah u dhagax dhigeen Xarun cusub oo uu yeelan doono G/wakiilada JSL mustaqbalka.

❖ Xafiiska Gobolka Saaxil:-



Taariikhdu Markay ahayd **25/03/2014** .Xildhibaanada Golaha Wakiilada ee Guddida joogtada oo uu hogaaminayo Gudoomiye ku xigeenka Labaad ee Golaha Wakiilada **Md. Cali Yuusuf Axmed** waxay fureen xadhigana ka jareen xafiiskii labaad ee Golaha Wakiiladu uu ku Yeelan doono Gobolka Saaxil.



Sidoo kale waxay dhagax dhigeen xurun cusub oo uu Golaha Wakiiladu Ku yeelan doono Gobolka Saaxil mustaqbalka, si ay ugu shaqeeyaan Dadweynihii soo doortay mudda Goluhu fasaxa ku jiro. Ugu dambayntiina waxay shahaado sharaf siiyeen masuuliyiinta Gobolka Saaxil oo kala ahaa Gudoomiyaha **Gobolka Md. Cali Maxamed Cilmi, Duqa Magaalada Md. C/Shakuur Maxamuud Xasan (Cidin), Maareeyaha Dekada Eng. Cali Cumar Maxamed (Cali Xoor xoor) iyo** Xoghayaha Fulinta Dawlada Hoose ee Magaalada Berbara **Md. Suhayb Maxamed Cali**. Kuwaas oo xildhibaanadu Ugu mahad naqeen kuna amaaneen sida wada jirka ah ee ay xil-gudashadooda waajibka ah uga soo baxeen.

❖ Xafiiska Gobolka Tog-dheer:-



Taariikhdu markay ahayd **26/03/2014** Gudoomiye ku xigeenka Labaad ee Golaha Wakiilada **Md. Cali Yuusuf Axmed** oo ay wahelinayeen xildhibaadnada Guddida Joogtada ee Golaha Wakiilada ayaa si rasmi ah xadhiga uga jaray xafiiska saddexaad ee Gobolka Togdheer.



Sidoo kale waxa lagu wareejiyay shaqaalaha ka shaqayn doona xafiisyada Gobolada Xeerar (hard copy) ah oo ka kooban ilaa 30 Xeer. Looguna talagalay in bulshada Goboladaasi ay si sahlan u heli karaan xeerarka

Golaha wakiiladu ansixiyeen ayna la socdaan xeerarka ka ay soo saaraan Goalaha Wakiiladu.

16. Wufuuda Golaha Timi:-

Waxa xarunta Golaha wakiilada JSL soo booqdey Wafti ka socda Dalka Sweden oo ay hogaaminaysay Xildhibaanad ka tirsan xildhibaanada Dalkaas iyo Afar Xubnood oo kale.

Waftigaas oo kala ahaa Xildhibaan ka socda Dowlada Hoose, Qoraa Cilmi baadhiseed, Joornaalis iyo Dhakhtar waxaana xarunta Golaha wakiilada Ku la kulmay Gudoomiye Xigeenka labaad ee Golaha Wakiilada Mudane **Dr**

Cali Yuusuf Axmed waxyaaba ay ka wada hadleena waxaan ka mid ahaa sidii ay xog-ogaal uga noqon lahaayeen arimaha Somaliland oo uu Gudoomiyuhu uga waramay.

Waxaa kale oo ay kawada hadleen intuu uu Golaha wakiiladu jiray marka laga soo bilaabo 1991 ilaahada wixii u Qabsoomay iyo Qorshayaasha Mustaqbalka ee Baarlamaanku Hiigsanayo iyo dimuquraadiyada ay Somaliland ku caano maashay heerkaana ay ku gaadhay nabada iyo Xasiloonida ay ku naaloonayso oo uu Gudoomiyuhu faahfaahin uu ka siiyay waftiga.

Dhanka kale waxa uu gudoomiyuhu war bixin aad u dheerayd ka siiyay Doorashooyinkii Somaliland u Qabsoomay iyo sida ay u qabsoomeen oo run ahaantii ahaa wax lagu faani karo sida qiimaha iyo qadarinta leh ee ay inoogu qabsoomeen oo waftiguna inoo qiray sida wanaagsan ee ay doorashooyinkii ina dhaafay inoogu dhaceen, iyadoo ay ka wadda hadleen wakhtigaas doorashoyinka soo socda mustaqbalka ee la filayo in ay qabsoomaan.

Waxa kale oo uu Gudoomiya **Dr Cali Yuusuf Axmed** uu La kulmay Masuul Ka socda UNDP oo qaabilsan Baarlamaanada Somaliland Iyo Somalia waxyaabaha ay ka wada hadleena waxa ka mid ahaa sidii ay nooga kaalmayn lahaayeen si gaar ah aqoon korodhsiyada Xildhibaanada iyo Shaqaalaha Baarlamaanka, waxa kale oo ay isla soo qaadeen in gudi Hoosaadyada Golaha wakiilada loo sameeyo Safaro Aqoon karodhsi oo dibada ah.

Waxa kale oo uu la kulmay Gudoomiyuhu **Mr PERHINDGARAD** oo ah Ambassador and senior Advisor (Horn Of Africa) isaga oo aqoon dheeraada u leh Geeska Africa safiirna ka soo noqday dalalka Sudan, Ethiopia, iyo Kenya isla markaana Aqoon balaadhan u leh Somaliland iyo Somalia.

Waxyaaba ay ka wada hadleen Mr Perhindgarad waxaa ka mid ahaa Gooni isku taaga Somaliland iyo siyaabaha ay u doonayso Somaliland aduunyada inteeda kale iyo ilaa hada wixii u Qansoomay

04/08/2014, waxa uu Gudoomiyaha Golaha Wakiilada **Md. C/raxmaan Maxamed C/laahi (Cirro)** iyo ku xigeenka labaad ee Gudoomiyaha Mudane **Dr. Cali Yusuf Axmed** kulan kula yeesheen Xafiiska Gudoomiyaha Wafti ka socday IGAD oo kala ahaa:

Ambassador Maxamed Cabdi Afey Uqaybsanaha IGAD ee Somalia/Somalilandba iyo **Dr. Axmed Xasan mataan** Uqaybsanaha Caafimaadka ee IGAD.

Salaan iyo soo dhawayn kadib, waxa hadalka furay Dr. Axmed Xasan oo ka mahadnaqay soo dhawaynta iyo kulankan ay la yeesheen Gudoomiyaha isagoo intaa kadibna hadalka ku wareejiyay AMBASSADOR Maxamed Cabdi Afey, oo isaguna ka waramay sababta socdaal kooban iyo kulankan ay layeelanayaan Gudoomiyaha.

Wuxuu sheegay in Ambassador Maxamed Cabdi Afey sababta ay halkan u yimaadeen tahay, inay ogaadaan sida wanaagsan ee ay Somaliland wax u qabsatay dhinacyada amniga, caafimaadka iyo arrimaha kale ee bulshada, islamarkaana maadaama ay Somaliland ka mid tahay bulshooyinka IGAD in wixii laga caawin karayo laga caawiyo iyadoo loo eegayo hadba baahiyaha ugu muhiimsan.

Waxa kale oo uu sheegay Ambassador Maxamed Cabdi Afey in Somaliland ay ku casuumi doonaan shirwayn oo caafimaadka ku saabsan oo ka dhacayay Addis-Abbaba kaas oo ay kasoo qayb gali doonaan ilaa 500 oo wufuud ah, halkaas oo la filayo in laga helo kharashyo dheeraad ah oo wax lagaga qabto dhinacyada caafimaadka ee bulshooyinka wadamada IGAD.



Sidoo kale wuxuu sheegay in shirkan ay Gudoomiyaha layeelanayaan ay doonayaan inay ku ogaadaan, waxyaalaha ugu muhiimsan Baarlamaan ahaan iyo institutions-ka kaleba ee ay loo baahan yahay si ay IGAD u hordhigaan marka fund la helana ay Somaliland qaybteeda uga hesho.

Wuxuu intaas raaciyay Ambassador –ku in IGAD danaynayso nidaamka doorasho ee ka hirgalay Somaliland in uu halkaa kasii socdo isla markaana ay wixii taageero ah ee ay ku caawin karaan la garab taagan yihiin.

Wuxuu kale oo uu ku daray in maadaama uu mudo dheer baarlaman soo ahaan jiray uu garanayo wuxuu yahay baarlamaanku oo la'aantiis aanay dawladnimadu wax jira noqonayn, inuu isagana ogaado wixii caqabado ah ee haysta, maadaama ay leeyihiin qayb arimahaas wax kala caawisa wadamada IGAD.

Intaas ka dibna, waxa hadalka la wareegay Gudoomiyaha Golaha Wakiilada oo waftida uga mahad celiyay booqashadooda warbixin balaadhana ka siiyay xaalada guud ee dalka dhinac siyaasadeed iyo dhinac bulsho labadaba, isagoo sidoo kale ka waramay baahiyaha ugu muhiimsan ee xiligan horyaala Somaliland.

Ugu horayn wuxuu sheegay Gudoomiyuhu in Somaliland ay baahi u qabto ka qayb galka forums-ka caalamiga ah taas oo waxyaalo fara badan oo iskaashi iyo waxyaalo fara badani ay kaga xanibanyihiin.

Gudoomiyuhu isagoo hadalkiisa sii wata wuxuu yidhi “Waxaanu isku daynay inaanu la xidhiidhno Baarlamaanada taas oo ilaa hada aan noo suuro galin marka laga reebo Common wealth-ka oo mararka qaar nagu casuuma tababarada”.

Wuxuu ka waramay Gudoomiyuhu sida ay Somaliland ugu baahan tahay inay wax ka soo gaadhaan mashaariicda IGAD hadii uu Baarlamaan yahay iyo hadii uu Wasaarado yahayba. Wuxuuna yidhi:- “Sida aad ogtihiinba Somaliland waa dawlada iyadu isa samaysay ilaa imika ma hesho wax caawimo oo toos ah, miisaaniyada Somaliland waxa markii uu baarlamanankani yimid waxay ahayd 40 milyan iyadoo imika maraysa ilaa 250 milyan intaas oo sixir bararkiina dhinac socdo”.

Dhinaca Baarlamaanka wuxuu ka waramay Gudoomiyuhu in markii Baarlamaankani yimid la isticmaali jiray aqal yar oo kooban oo ingiriisku ka tagay, kaas oo Gudoomiyaha iyo Gudoomiye ku-xigeenadu isku xafiis ahaan jireen. Inkasta oo loo dhisay dhismayaal wanaagsan hadana wali wuxuu u baahan yahay in loo dhiso oo baahiyaha ugu horeeyana ay ka mid tahay; library iyo Caffateria.

Gudoomiyuhu isaga oo arintaas sii wata wuxuu sheegay inkastoo uu jiro haykalkii guud ee Baarlamaanku in hadana aanay Xildhibaanadu lahayn xafiisyo Goboladii ay ka yimaadeen xataa kharash ay ku tagaan aanay haysan.

Wuxuu intaas ku daray in ay ka caawisay hay'adda UNDP oo shan xafiis uga kiraysay Gobolada, xafiisyadaasna qalabayntooda cid naga caawisa hadii aanu heli lahayn way fiicnaan lahayd ayuu raaciyay, sidoo kale wuxuu sheegayn in baahiyaha Baarlamaanka ay ka mid tahay in aanay u safri

karin Dalalka kale si ay aqoon korodhsi iyo Xidhiidh ula sameeyaan baarlamaanda kale.

Wuxuuna IGAD u soo jeediyay oo uu yidhi:- “In Baarlamaanka xiligiisu uu dhamaaday markaa inay naga caawiyaan doorashooyinka soo socda oo wixii doorasho wanaagsan caawinayaba ay nala garab taagnaadaan waayo farsamo ahaan dhibaatooyin badanbaa jira sida meelaha fog fog oo kale malaha laydh taas oo keenta oo goobaha doorashooyinka hore loo xidho, iyo inay goob joogayaal u soo diraan doorashooyinka”.

Waxa kale oo uu Gudoomiyihu warbixin ka siiyay Waftiga IGAD Ciidamada oo uu sheegay iney tababaro u baahan yihin joogto ah, Xaga dab-damisyada oo aan marka Hargeysa oo iminka dhowr la keenay laga reebo aaney Gobolada kale ka jirin oo ay u baahan yihin, Caafimaadka oo runtii baahi weyni ka jirto oo waxaaba lagu garan karaa in Somaliland Hargeisa uu ka jiro hal Cusbital oo ingiriisku ka tagay magaalooyinka kalana ka sii liitaan, miisaaniyada yar ee Somaliland soo ururisaana 50% waxay ku baxdaa amaanka iyadoo 50% ka soo hadhayna aanu ku filayn sectors-ka kale oo dhan.

Ugu dambayntii, wuxuu shirku ku soo gabagaboobay in Ambassador **Maxamed Cabdi Afey** uu sheegay in warbixintan iyo kuwa madaxda kale ay kala kulmeenba ay hordhigi doonaan IGAD islamarkaana ay doonayaan in kharashka IGAD hesho looga faa’idooyo bulshada Geeska Africa oo Somalilandna ay ka mid tahay taasna ay ku dadaali doonaan.

Sanadkii 2014kaIntii lagu jirey, Wuxuu kulan ku dhexmaray Xarunta Golaha Wakiilada Shirgudoonka Golaha Wakiilada oo uu weheliyo Xoghayaha Guud ee Goluhu iyo wafti uu hogaaminayo Madaxa UN-ka Hawlgalka Somalia iyo Somaliland **Nicolas kay**.

Kulankaas oo ahaa mid arimo farabadan laysla soo qaaday ayaa waxaa furay shirka Guddoomiyaha Golaha Wakiilada Mudane **C/raxman maxamed C/laahi (Cirro)** kaas oo kala hadlay u qaybsanaha arimo fara badan oo ay ka mid ahaayeen:

Ugu horayn wuxuu Guddoomiyuhu kala hadlay Qadiyada Somaliland isaga oo carabka ku adkeeyay in aan marnaba arinta Somaliland Madaxbanaanideedu ay tahay mid aan inaba wax gor-gortan laga galayn.



Waxa kale oo uu Gudoomiyuhu uga waramay in Somaliland ay hayso wadada horumarka iyo Dimuquraadiyada taas oo loo baahan yahay in kor loo sii qaado.

Waxa sidoo kale uu sheegay, in ay jiraan arimo u baahan in wax laga qabto oo Somaliland hada culays wayn ku ah, taas oo ay ka mid tahay shaqo la'aanta dhaliyarada Somaliland oo badankoodu aan maanta wax shaqo ah heli Karin.

Xaga nabadgelyada ayuu sidoo kale Gudoomiyuhu sheegay in loo baahan yahay in UN-tu wax kala qabato, sidoo kale arinta doorashooyinka ayuu sheegay Gudoomiyuhu in ay Somaliland ka caawiyaan oo ay u soo diraam Goobjoogayaal.

Waxa kale oo uu ka waramay Gudoomiyuhu, in Xeerkii diiwaangelinta ay ansixiyeen Golaha wasiiradu iyadoo la horkeenay wakhtigaas Goleyaasha sharci dejinta oo lagu talo galay in lagudhamayo mudo Saddex todobaad ah.

Dhinaca kale wuxuu Gudoomiyuhu kala hadlay in khilaafaadka Xaga Xuduudaha ee ka dhaxeeya Somaliland iyo wadamada jaarka ah, uu aaminsan yahay in lagu dhameeyo sida ugu wanaagsan ee wada hadal ah. Sidoo kale waxa uu Gudoomiyuhu cadeeyay in ay taageersan yihiin wada-hadalada Somaliland iyo Somalia oo arimaha laga gaadhay ay ka mid tahay arinta Xaga hawada taas oo dawlada Somalia ay ka baxday taas oo uu Gudoomiyuhu sheegay in loo baahan yahay in la hirgaliyo, si ay wada-hadaladu hore ugu sii socdaan, Iyo in loo baahan yahay in la balaadhiyo Ka-soo-qaybgalayaasha shirarka sidii ay markii horeba ku bilaabmeen taas oo ay kasoo qayb gali jireen wadamo kale meesha shirka lagu qabanayo.

Intaas kadib, waxa isna hadalka la wareegay Gudoomiye ku xigeenka 2aad ee Golaha Wakiilada **mudane Cali yusuf Axmed** oo isna ka waramay Qadiyada Somaliland iyo sida ay lama taabtaanka u tahay, wuxuu sheegay in waxyaalaha ay Somaliland ay nabadgalyada u tahay ay ka mid tahay inay

maanta Xoriyada buuxda haysato oo ay ka go'day Somalia, kadib markii midawgii Somalia ay Somaliland ku khasaartay ee ay kala kulantay Xasuuq. Sidoo kale wuxuu Gudoomiye Cali yusuf tusaale us oo qaatay in ay maanta jiraan wadamo si nabadgelyo ah u kala go'ay sida wadankii la odhan jiray **Checkslovakia** oo hada noqday **Check Republic** iyo **Slovakia** sida la arkayna ay hada ka wanaagsanaadeen markii laysku jiray, waxa kale oo uu Gudoomiyuhu soo qaatay in aanay suuragal ahayn in dadkii isku qoomiyad ahiba ay hal dal yeeshaan taasna aanay ahayn wax suuro galaya.

Intaas kadib, waxa hadalka lagu wareejiyay Madaxa hawlgalka Qaramada midoobay ee Somalia/Somaliland kaas oo ugu horayn sheegay in Xafiiskiisu uu leeyahay laba qaybood qaybta siyaasada iyo qayb bini'aadamnimo, iyadoo intaas raaciyay in qaybta siyaasadu aanay ka shaqaynin Somaliland, balse UN-tu ay Somaliland joogtay mudo aad u dheer isla markaana ay Somaliland kala shaqaynaysay arimaha bini'aadamnimada.

Wuxuu sheegay in ANSOM ay leedahay qaybo faa'iido u yeelan kara Somaliland oo ay doonayaan inay kala shaqeeyaan sida:-

- Arimaha Gender-ka
- Saxaafada
- Arimaha Bini'aadamnimada
- Dhismaha hay'addaha Dawladeed
- Nabadgelyada
- Cadaalada
- Police-ka

Sidoo kale, wuxuu **Nicolas kay** ku aamaaney Somaliland nidaamka dimuquraadiyadeed ee ka jira, kaas oo uu sheegay inay tusaale u tahay wadamo fara badan oo ay somaliyana ku jirto.

Wuxuu sheegay inay dhiirigalinayaan wadahalalada Somaliland iyo Somalia iyagoo ku dadaali doonaan in arimaha ka soo baxa la fuliyo. Balse uu isagu u soo diran doono dad uga soo warama xafiiskiisa arimaha doorashada.

Arinta xaga Goobjoogayaasha wuxuu sheegay in xafiiskiisani aanu go'aamin Karin, balse ay tahay in Xubnaha Qaramada midoobay ay ogolaadaan.

Sidoo kale, wuxuu ku daray inay dhiirigalinayaan wada-hadalada Turkiga dhawaan in dhakhso loo bilaabana ay ka shaqaynayaan isagoo sheegay in arinta Gudoomiyuhu ka dhawaajiyay ee ah in la balaadhiyo goob joogayaashana laga hadli doono.

17. Safardii Dibada:-

Waxaa **11 December 2014kii** Safar ku tagey Gudoomiyaha Golaha **Md. C/raxman Maxamed Cabdilaahi (Cirro)** iyo Gudoomiye ku-xigeenka 1^{aad} ee Golaha **Md. Baashe Maxamed Faarax** Dalka aynu jaarka nahey ee itoobiya, gaar ahaan kilidhka **Bishigo** ee Koonturta dalkaas oo lagu qabanayay Xuska Maalinta Qoomiyadaha Itoobiya oo sanadkasta bisha December la qabto laguna casuumo Shir-gudoonka Golaha Wakiilada.

Hadaba, waxa Gudoomiyayaasha Golaha ku soo dhoweeyay Kilidhka **Bishigo** Madaxweynaha Kilidhkaas **Axmed Nasiir**, Xildhibaan Dalkaas ah oo heer qaran ah iyo Madaxda kale ee Kilidhkaas.

Gudoomiye Cirro iyo Gudoomiye ku-xigeen Baashe intii aaney u duulin Kilidhka Bishigo waxay Caasimada itoobiya ee Adisababa kula kulmeen Safiirka Dalka Ingiriiska u fadhiya eithiopia, waxayna Safiirka kulankaas kaga wada-hadleen arrimo badan oo ka mid tahay Xaalada Amni ee Mandaqada Geeska Afrika gaar ahaan Argagixisada iyo Budhcad Badeedka, sidoo kale waxay isla soo qaadeen Xaalada Guud ee Somaliland gaar ahaan arrimaha Doorashooyinka.



Safiirka Dalka Ingiriiska u fadhiya Dalkaas itoobiya, wuxuu isna dhiniciisa kulanka ka sheegay sida uu dalkiisu u jecel yahay inay Somaliland sii wado horumarka dhinaca Dimuqraadiyada, gaar ahaan sidii dalka ay uga dhici laheyd doorasho xor iyo xalaal ah oo ka turjumaysa rabitaanka shacbiga reer Somaliland.

Wada-Hadaladii Somaliland iyo Somaliland ee Sanadka 2014ka:-

16 Jan 2014ka waxaa Magaalada Istanbul ee Dalka Turkiga ka dhacey Kulan ay ka qeyb-galeen Wufuud ka kala Socotada Dawlada Somaliland iyo Dawlada Somaliya, waftiga Somaliland ee ka qeyb-galey Shirka waxa ka mid ahaa Gudoomiye ku-xigeenka 1^{aad} ee Golaha Wakiilada **Md. Baashe Maxamed Faarax** iyo Gudoomiyaha Gudidda Arrimaha Dibada iyo Iskaashiga Caalamiga ah **Md. Axmed Cabdi Nuur (Kijandhe)**.

Wada-hadalada Somaliland iyo Somaliya ayaa hore ugu kulmey dalkaas Turkiga waana markii saddexaad ee ay ku kulmaan Miiska Wada-hadalka Somaliland iyo Somaliya, labada wafti waxa kala hogaaminayey Wasiirka Arimaha Dibadda ee Somaliland **Maxamed Biixi Yoonis** iyo Wasiirka Arimaha Aminiga Qaranka ee Dowladda Somalia **Cabdikarin Xuseen Guuleed**.

December 2014, waxa Gudoomiye Ku-xigeenka 1^{aad} Md. **Baashe Maxamed Faarax** iyo Gudoomiyaha Gudidda Arrimaha Dibada iyo Iskaashiga Caalamiga ah **Md. Axmed Cabdi Nuur (Kijaandhe)** ka mid ahaayeen Wafti balaadhan oo Somaliland oo uu Hogaaminayay Madaxweynaha Somaliland **Md. Axmed maxamed Maxamuud (Siilaanyo)**, Waftigaas oo dalka kaga qeybgaley Wada-hadalka Somaliland iyo Somaliya oo uu marti qaadey Madaxweynaha Dalka Djabuti **Md. Ismaciil Cumar Geele**.



Wada-hadalkaas oo ka dhacay Caasimada Wadankaas ee Djabuuti ayaa waxa December 21, 2014 laga soo saaray qodobo ay isla garteen labada Madaxweyne Siilaanyo iyo dhigiisa Somaliya Xasan Sheekh iyo ergooyinka wehelinayay, kuwaasi oo ah waxyaabo ay labada dhinac iska kaashanayaan.

Qodobada ka soo baxay Wada hadalka furmay waxa ka mid ah:-

1. In la dardar galiyo wada hadalada labada dhinac, islamarkaana wakhti lagu jaangooyo.
2. Labada dhinac waxay ku heshiiyeen in arimaha siyaasadda ee Masiiriga ah Lagu dhiirado, lana fuliyo waxyaabihii hore loogu heshiiyay oo ah in laga dhawrsanaado waxyaabaha wada hadalka carqaladayn kara.

3. Inaan la Siyaasaddayn deeqaha Bani'aadanimo iyo Mashaariicda dib-udhiska walibana la dhiiri galiyo.
4. In la fuliyo Heshiiskii Hawadda (In labada dhinac wada jir u maamulaan hawadda).
5. Labada dhinac waxay ku heshiiyeen in la isla garto inay wada-hadalada ka qayb gali karaan Khubaro farsamo iyo Wadamada Saaxiibka ahi marka loo baahdo.
6. In Ergada labada dhinac ee Somaliland iyo Somalia madasha tan xigta ay ku kulmaan dalka **Turkiga 15-16-ka January sanadka 2015-ka.**

18. Mudanaayshii Golaha ka geeriyooodey 2014ka:-

Intii lagu jirey Sanadka 2014ka Waxaa Golaha Wakiilada ka geeriyooodey Allah ha u naxariistee **Md. Fu'aad Sh. Maxamuud Cabdle** oo ku geeriyooodey Dalka Ingriiska oo Xaalad Caafimaad ugu maqnaa, Xildhibaan Fu'aad oo laga soo doortey Gobolka Saaxil isla markaana ka soo baxay Xisbiga UCID, wuxuuna soo buuxiyay kursigii **Md. Axmed Maxamed Cali (Beegsi)** oo ka mid ahaa afar xildhibaan oo Xubinmada Golaha laga saarey ka dib markiisida Dastuurku dhigayo ay ka soo xaadiri waayeen in ka badan **20** fadhi oo Goluhu yeeshay.

Waxa kursiga Marxuumka soo buuxiyay isaguna **Md. Xaamud Cismaan Cigaal** oo ka mid ahaa Keydka Xibiga UCID ee Gobolka Saaxil tirada codkana ku soo xigey Xildhibaan ka Geeriyooodey.

19. Mahadhooyinii Sanadka 2014ka.

Bishii **January 2014kii** ayaa waxa Golaha Wakiilada soo kala dhexgaley Khilaaf iyo Muran ka soo bilawday isku-shaandheynta Gudiyada Golaha isuna bedelay in la gaadho Marxalad Xaasasiya oo dib loo qaban Karin ayaa Golaha Guurtidu ka Codsadey in maalintii ay bishu aheyd **08/ 02/2014** iney dib u dhigaan fadhigoodii taas oo uu ka aqbaley.

Khilaafkaas oo sii kordhey ayay Golaha Guurtida ula muuqatey in la dhexdhaxaadiyo oo la isku dayo in la isku soo dhoweeyo dhinacyada, iyadoo codsadey in la hakiyo fadhiyada Golaha oo dib loo dhigo mudo toddobaaad ah Maalintii **10/02/2014.**

Labada dhinac ee iska soo-horjeedda ee Golaha Wakiilada ayaa ka codsaday Golaha Wakiiladda kama ay soo bixin natiijo iyo is af-garad waxayna Guddigii Golaha Guurtidda dib uga soo celiyeen arrinkii **15/02/2014.**

Haddaba, Guddigii Golaha Guurtida ee Dhex-dhexaadinta markii ay waraystay labadii dhinaca Guddiyaddoodii **16/02/2014,** kana xog-wareystay bal waxay isku hayaan ee khilaafka dhaliyay iyagoo is hor-fadhiya, isla markaana laga saxeexay kalsooni buuxda

17/02/2014, ayuu Golaha Guurtidu u soo gudbiyay Qoraal uu ku dhex dhexaadinaayo labada dhinac kaas oo ka kooban 3 Qodob dhinac walbana uu ku qancey aqbaleyna, wuxuuna u dhingaa qoraalka garqaadista ahi sidan:-

- 1. In aqlabiyada Xilka laga qaadi karo Gudoomiyaha iyo labadiisa ku-xigeen oo shir-gudoon si isku ah ay noqoto kala badh iyo hal oo ah (absolute majority) 42 xubnood tirada guud ee Xubnaha Golaha Wakiilada marka ay soo jeediyaan saddex meeloodow meel (1/3 oo ah 27 mudane tirada Guud ee Xubnaha Golaha Wakiilada jsl).*
- 2. In shir-gudoonka oo ah Gudoomiyaha iyo labadiisa ku-xigeen aan la soo dhigi Karin Moshin xil ka xayuubin ah mudada xilka Golaha uga hadhsan, hadaaneey xilkooda u gudanwaayin si waafaqsan Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada iyo Dastuurka Qaran JSL.*
- 3. In Gudoomiyuhu ku dhawaaqo xidhitaanka kal-fadhiga 23^{aad} ee Golaha Wakiilada, isla fadhigan maantana Goluh galo fasixiisii caadiga ahaa..*

Intaa kadib, Gudoomiyaha Golaha Wakiiladu **JSL Md. C/raxmaan Maxamed C/laahi (Cirro)** isagoo ku hadlaya Afka Golaha Wakiilada JSL wuxuu Mahadnaq balaadhan u soo jeediyay Odayaasha Golaha Guurtida Doorarka weyn ee ay ka qaateen Xalinta khilaafkaas, isagoo sheegay inay Aqabaleen Go'aankaas dhex-dhexaadinta ah isla markaa raaligalin u direy Shacabka Somaliland Muranka iyo Khilaafkaas Golaha Wakiilada hadheeyay Fadhiyadii u dambeeyay, Wuxuuna Gudoomiyuhu Sidaa ku soo xidhay Kal-fadhigii 23^{aad} isagoo sheegay inuu Goluhu galayo fasax 8 toddobaad ah.

30 September ilaa 11 November 2014ka, Golaha Wakiilada JSL, waxa ka dhex-dhashay khilaaf salka ku hayay Wax ka badalkii iyo Kaabistii Xeerka Diiwaangalinta Codbixiyayaasha Xeer Lr. 37/2007 oo Goluhu ansixiyay, kadib markii Xeerkaa loo gudbiyay Golaha Guurtida ayay Mudanayaasha Muxaafidka ee Xisbiga Kulmiye ee Golaha Wakiiladu sheegeen in Xeerka wax ka badal lagu sameeyay oo aanu aheyn sidii lagu ansixiyay.

Intaa ka dib, waxay Furitaaankii Kal-fadhigan 26^{aad} ay mudanayaasha Muxaafidku ay Mooshin Xil ka qaadis ah ku soo oogeen Gudoomiyaha Golaha Wakiilada **Md. C/raxmaan Maxamed C/laahi**, waxayna furitaaankii kal-fadhiga **11/11/2014** Golaha la horkeenay Mooshinkaas iyadoo Golaha la keenay Ciidamo badan xildhibaanada Muxaafidkuna isugu yimaadeen Fadhiga inay Cod u qaadaan Mooshinkaas, halka Xildhibaanada Mucaaridku aaney ka xaadirin fadhigaas.

Intaa ka dib intaanu furmin fadhigii loogu balansanaa Mooshinka Xildhibaanada Muxaafidku ay diyaar ku yihiin Xarunta Golaha ayaa waxa

soo dhex-galey Golaha Guurtida oo uu hogaaminayo Gudoomiyaha Guurtida **Md. Saleebaan Maxamuud Aadan**, waxayna ka dalbadeen Mudanayaasha iyo Gudoomiye ku-xigeenka 1aad ee Golaha oo fadhiga Gudoominayay inay fadhiga dib ugu dhigaan xaaladana ay iyagu dhex-dhexaadiyaan, wada-hadal kadibna waxay ka aqbaleen Codsigaa Golaha Guurtida.

Sidoo kale waxa maalintaas ka dhacey Magaalooyinka Burco iyo Ceergaabo Mudaharaado, iyadoo Magalaada Hargeysa Lagu Xidh-Xidhay Koox Xildhibaanoo oo Garabka Gudoomiyaha Golaha Xildhibaanadaas oo ah 5 xildhibaan waxay kala ahaayeen, Md. Ibraahim Mahdi Buubaa, Md. Bashiir Tukaale, Md. Maxamed Saalax Cige iyo Md. Siciid Cilmi Rooble, iyadoo Habeenimadii ka horeysayna Saldhiga Dhexe ee Magaalda Hargeysa lagu xidhay Xoghayihii Guud ee Golaha Wakiilada Md. C/risaaq Siciid AYAanle oo mudo 10 Cisho ah ku xidhnaa Saldhiga.

Golaha Guurtida oo ah Gole dhaqan oo inta badan ku suntan daminta iyo maareynta khilaafyada Siyaasadeed iyo kuwa kaleba waxay kulamo la yeesheen labada dhinaca ee Golaha Wakiilada oo khilaafku ka dhex-jirey, waxay Gudi u saareen ka 14 xildhibaan iyo Xoghayaha Guud ee Golaha Guurtida, waxayna Golaha Guurtidu Go'aamadii ka soo baxay ka yeedhiyeen 22/11/2014 Xarunta Golaha Guurtida oo ka soo xadireen Shir-gudoonka Golaha Wakiilada iyo Xildhibaanada Golahaasi, waxay kadib ku dhawaaqidii qodobadii Dhex-dhexaadinta labada dhinacaba sheegeen inay aqbleen halkaana uu ku soo af-go'ay Khilaafkii Golaha Wakiiladu.

Go'aanka G. Dhex-dhexaadinta khilaafka G/Wakiiladda:-

Guddidigii Golaha Guurtidu u xilsaaray dhex-dhexaadinta khilaafkii Golaha Wakiiladda JSL ee Maalintii 15/10/2014, kuna saabsanaa mooshinkii xil-ka qaadista Guddoomiyah Golaha, ayay guddigu fadhigoodii ugu horeeyay ku samaysteen Ajandahoodii, waxayna labaddii dhinac ku wargeliyeen cidii u matali lahayd dooddooda wada-hadalka, iyaga soo raacinaya warqadihii kalsooni-bixinta.

Intaas ka dib waxay Gudigu kulamo kala gaar –gaar ah la yeesheen labadii dhinac, kagana dhegaysteen dacwadahoodii af iyo qoraalba.

Hadaba, Guddigii Golaha Guurtidu u xilsaaray dhex-dhexaadinta khilaafkii Golaha Wakiiladdu:-

- Markii ay dhegaysteen dacwadaha dhicanyada khilaafku ka taagna.
- Markii ay arkeen, akhristeena qoraaladii kala duwanaa ee dhinacyadu u soo kala gudbiyeen.
- Markii ay darsen, lafa-gureen qoraaladii ay is waydaarsadeen labada Guddoomiye (Guurtidda & Wakiiladda), kuna saabsanaa mashruuca Xeer No:- 37/2007 ee wax-ka -bedelka iyo kaabista diiwaan-gelinta Cod-bixiyayaasha iyo Muwaadidniinta.

Markii ay guddigu yeesheen falanqayn iyo dood-dheer waxa u sugnaaday, yaqiina noqday Arrimahani:-

B. In Msharuuca Xeer No: 37/2007, ee wax-ka-bedelka iyo kaabista diiwaangelinta cod-bixiyayyaasha iyo Muwaadiniinta la geliyay khaladaad iyo laaxin qoddobada qaarkood markii loo soo Gudbinayay Golaha Guurtidda ee Coddantii Golaha Wakiiladda ka dib.

T. Curyaamin ku timad habsami-u-socodkii hawlaha Golaha oo ay ahayd in la ansixiyo Xubnihii Loo soo magacaabay Guddiga Doorashooyinka Qaranka, Ansixinta Miisaaniyadda 2015 IWM.

J. Waxa caddatay in khilaafkaasi u dhaliyay khal-khal siyaasadeed, Nabad-galyo iyo jahawareer saameeyay Bulashada Reer soomaliland Gudo iyo Debadba, horseedayna deganansho la'aan iyo xasilooni-daro.

Sidaasi darteedna, Guddigu iyagoo xeeriyay, tix-galiyay maslaxadda guud ee Qaranka ee siyaasadeed, Nabad-galyo, dhaqaale, horumarin bulsho, geedi socodka hananka dimuqraadiyadda, hiigsiga Mustaqbalka fog ee reer soomaliland , midnimada iyo wada jirka shacabka.

Waxay Go'aamiyeen qoddobaddani:-

1. Waxa la laalay mooshinkii xil ka qaadista Guddoomiyah Golaha Wakiiladda, wadeena dhinicii uu hogaaminayay Guddoomiye ku-xigeenka laad ee Goluhu. Loomana soo jeedin karo mooshin ku saabsan xil ka qaadis, ilaa inta ka horaysa waqtiga uu xeerku u cayimay xil ka tegista musharaxa u tartamaya xilka madaxwayne.
2. Khaladadkii ku dhacay mashruucii xeer ee wax-ka-beddelka iyo kaabista xeer No 37/2007, kuna saabsanaa diiwaangelinta cod-bixiyayaasha iyo muwaadiniinta , mas'uuliyaddeeda u leeyahay Guddoomiyah Golaha Wakiiladdu, maadaama uu yahay mas'uulka ugu sareeya maamulka Golaha, leeyahana saxeexa gudbinta xeerarka IWM.
3. Waxa khalad ahayd baajintii ku timid kal-fadhigii aan caadiga ahayn ee 26/10/2014, looguna tala galay ansixintii xubnihii komishanka Qaranka iyo Miisaaniyadda 2015 IWM.
4. Waxa waajib ku ah Guddoomiyah Golaha wakiilada inuu xildhibaanada Golaha ku maamulo, kuna hoggaamiyo dhex-dhexaadnimo, isla markaasina uu meel-mariyo oo kaliya Go'aamadda uu Goluhu aqalbiyadda ku ansixiyo.
5. Xeerarka ka gudbaya Golaha Wakiiladda, ansixinta Mudanayaasha ka-dib, waa in shir-gudoonku iska hubiya Gudbinta ka hor.

6. Xubnaha Golaha Wakiiladdu, waa in ay wajibaadkooda si hagar la`aan ah u gutaan, dhamaanbana hawlaha muhiimka ee horyaala u socodsiiyaan si habsami ah oo xilkasnimo ku jirto.
7. Iyado la- tix-galinayo, lagana taxadirayo sii jiitan iyo khilaaf dambe oo sabab u noqda dib-u dhac ku yimaada doorashooyinka, waxa Golaha Guurtidda loo xilsaaray inuu xal-ahaan u saxo khaladaadkii mashruuca xeer ku dhacay, isla- markaana ka guto waajibaadkiisa dastuuriga ah. (Mashruucii xeer No 37/2007, ee wax-ka- beddelka iyo kaabista xeerkii diiwaangalinta cod-bixiyaasha iyo muwaadinninta).
8. Xukuumadda wax xil-ka saaranyahay dhawrista xisaanadda mudanayaasha, mudanayashana waxa waajib ku ah in aanay sharciga gacanta ku qaadan, falagaraansahana ka fogaadaan, isla markaasina aanay bulshada u horseedin khal-khal iyo degaansho la`aan.
9. Ilaa inta laga gaadhayo waqtiga xeerku u jideeyay ololaha tartanka doorashooyinka, waxa ka reeban xisbiyadda Qaranka, wax u muuqan karaya olole iyo abbaabul dad-wayne, ahna shacaa`ir kasta oo muujiniya kaanbayn doorasho (Election Campaign).

Appendix A

Liiska Magacyada Mudanayaasha Golaha Wakiilada:-

No.	Magaca	Gobolka	Xisbiga
1.	Abuubakar C/raxmaan Good	Awdal	Kulmiye
2.	C/raxman Maxamed Jaamac	Awdal	Kulmiye
3.	Mahdi Xuseen Cadare	Awdal	Kulmiye
4.	C/laahi Axmed Yuusuf (Madar)	Awdal	UCID
5.	Mahdi Cabdilaahi Maxamuud	Awdal	UCID
6.	Muuse Maxamed Ismaaciil Waabari	Awdal	UCID
7.	C/qaadir Jibril Tukaale	Awdal	UDUB
8.	Axmeed Barkhad Obsiye	Awdal	UDUB
9.	Cabdi Maxamuud Jaamac Gaagaale	Awdal	UDUB
10.	Cali Sheekh Ibraahin Araye	Awdal	UDUB
11.	Xasan Muuse Hufane	Awdal	UDUB
12.	Maxamed Barkad Miigane	Awdal	UDUB
13.	Maxamed Yaasiin Sheekh Cali Ayaanle	Awdal	UDUB
14.	Axmed Cabdi Nur Kijaandhe	Hargeisa	Kulmiye
15.	Maxamud Jaamac Warfaa (Wadka)	Hargeisa	Kulmiye
16.	Axmed Maxamed Diiriye NacNac -	Hargeisa	Kulmiye
17.	C/laahi Xusen Cige (Blacky)	Hargeisa	Kulmiye
18.	Cali Yuusuf Axmed Jaamac	Hargeisa	Kulmiye
19.	Ibraahin Axmed- Haybe	Hargeisa	Kulmiye
20.	Maxamed X Maxamuud Cumar- Xaashi	Hargeisa	Kulmiye
21.	Maxamuud Axmed Obsiye	Hargeisa	Kulmiye
22.	Bashir Sheekh Xuseen Tukaale	Hargeisa	UCID
23.	Cabdiraxmaan Cismaan Caalin	Hargeisa	UCID
24.	Ibraahin Mahdi Buubaa	Hargeisa	UCID
25.	Khadar Aadan Xuseen	Hargeisa	UCID
26.	Maxamed Baaruud Shide	Hargeisa	UCID
27.	Xaashi Xuseen Caabi	Hargeisa	UCID
28.	Aadan Muxumed Hoorri (Mataan)	Hargeisa	UDUB
29.	C/kariim Aw- Cali Shabeel	Hargeisa	UDUB
30.	C/qaadir Xismaaciil Jirde	Hargeisa	UDUB
31.	Cabdiraxmaan Maxamed Jaamac	Hargeisa	UDUB
32.	Cali Obsiye Diiriye (Cali Gabiley)	Hargeisa	UDUB
33.	Xasan Cawaale Caynaan	Hargeisa	UDUB
34.	Maxamed Xuseen X Ciisse	Saaxil	Kulmiye
35.	Siciid Cilmi Rooble	Saaxil	Kulmiye
36.	Fu'aad Maxamuud Cabdule	Saaxil	UCID
37.	Cabdiraxmaan Maxamed Cabdillahi (Cirro)	Saaxil	UCID
38.	Faarax Maxamuud Cabdulle	Saaxil	UCID
39.	Maxamed Faarax Qabiile	Saaxil	UCID
40.	Aadan Xaaji Diiriye Dirir	Saaxil	UDUB
41.	Axmed Xasan Aadan Waysocadde	Saaxil	UDUB
42.	Siciid Cartan Cismaan	Saaxil	UDUB
43.	Maxamuud Jaamac Xaaji Cilmi (Dable)	Saaxil	UDUB
44.	Cabdiraxmaan Yuusuf Cali Cartan	Sanaag	Kulmiye
45.	Cali Maxamed Aadan Cali Barre	Sanaag	Kulmiye
46.	Ibraahim Jaamac Cali Maxamed Reyte	Sanaag	Kulmiye
47.	Maxamed Cismaan Maxamed Bulqaas	Sanaag	Kulmiye
48.	C/raxman Maxamed Talyanle	Sanaag	Kulmiye

49.	Maxamed Cali Jibriil	Sanaag	UCID
50.	Saleebaan Cawad Cali	Sanaag	UCID
51.	Baar Siciid Faarax	Sanaag	UDUB
52.	Cabdiqaadir Jaamac Xaamud	Sanaag	UDUB
53.	Ibraahin Carraale Cabdi (Ruush)	Sanaag	UDUB
54.	Ibraahin Maxamed Xuseen (Dhaadheere)	Sanaag	UDUB
55.	Maxamed Saalax Cige	Sanaag	UDUB
56.	Axmed Ducaale Bullaale	Sool	Kulmiye
57.	Baashe Maxamed Cabdi	Sool	Kulmiye
58.	Ibraahin Axmed Reygal	Sool	Kulmiye
59.	Maxamed Jaamac Cabdi	Sool	Kulmiye
60.	Cabdiqaadir Askar Xasan	Sool	UCID
61.	Siciid Maxamed Cilmi	Sool	UCID
62.	Siciid Warsame Ismaaciil	Sool	UDUB
63.	Cabdiraxmaan Muuse	Sool	UDUB
64.	Maxamed Axmed Maxamud (Dhakool)	Sool	UDUB
65.	Maxamuud Dhunkaal Gutaale	Sool	UDUB
66.	Saleebaan Yuusuf Cali Koore	Sool	UDUB
67.	Xariir Siciid Bullaale	Sool	UDUB
68.	Cumar Axmed Saleebaan (Sanweyne)	Tog-dheer	Kulmiye
69.	Maxamed Cumar Aadan	Tog-dheer	Kulmiye
70.	Maxamed Cali Xirsi	Tog-dheer	Kulmiye
71.	Maxamed X Yuusuf Axmed (Waabeeyo)	Tog-dheer	Kulmiye
72.	Xamse Maxamed Gaadaweyne	Tog-dheer	Kulmiye
73.	Cali Xasan Maxamed (Cali-mareexaan)	Tog-dheer	Kulmiye
74.	Jaamac Xasan Aadan	Tog-dheer	UCID
75.	Maxamed Jaamac Cali	Tog-dheer	UCID
76.	Naasir Xaaji Cali Shire	Tog-dheer	UCID
77.	Xuseen Maxamed Cigeh	Tog-dheer	UCID
78.	Axmed Maxamed Nuur Maxamed	Tog-dheer	UDUB
79.	C/casiis Ismaaciil Ducaale	Tog-dheer	UDUB
80.	Cali Xaaji Maxamed Muuse	Tog-dheer	UDUB
81.	Farxaan Maxamed Cali	Tog-dheer	UDUB
82.	Xuseen Ismaaciil Yuusuf	Tog-dheer	UDUB

Liiska Shaqaalaha Golaha Wakiilada:-

N	Names	Title
1.	Abdirisak Sa’ed Ayanle	General Secretary
2.	Jamal Jama Hassan	Deputy General Secretary
3.	Abdi Ismcil Xawadle	Director of Admin and Finance Department
4.	Awad Ali Mohamed	Director of Hansard, plenary and Committee Department
5.	Mahamuod Sulamen Omer	Director of Information, Technology and Research Department
6.	Abdinasir Osman Mahamoud	Director of Planning Department
7.	Hibo Mohamed Ibrahim	Director of Archives library Department
8.	Ismahan Yusuf Ibrahim	Director of Human Resource Department
9.	Ahmed Mohamed Eige	Director Of Protocol and Security Department
10.	Sulieman Abdisitar Dubad	Director of Communication and Public Relations Department
11.	Hamse Mohamoud X. Muuse	Logistic Officer
12.	Mubarik Farah Warsame	Adviser
13.	Mohamed Abdirahman Ducale	Adviser
14.	Mustafe Mohamed X. Dahir	Adviser
15.	Ahmed Ali Kahin	Adviser
16.	Huda Mohamed Ahmed	Head section of the Office G. Secretary & Committees Section
17.	Farah Ibrahim Gamute	Head of Accounting Office
18.	Mohamed Sa’eed Husein	Head of Adm.& finance
19.	Asiya Rashiid Egge	Head of Section HMR
20.	Aydarus Ega Khayre	Head of the Photo Copy office
21.	Ali Axmed Ibrahim	Secretary of Security and Intelligence Affairs Committee
22.	Ayanle Ahmed Abdi	Secretary Standing & Disciplinary Committee
23.	Yuusuf Habiib Hussien	Secretary Livestock & Environment Committee

24.	Maxamed Yusuf Ayanle	Head Section IT and Secretary Finance & Economic Committee
25.	Faysal Ibrahim Esse	Secretary of the Committee of Roads
26.	Abdillahi Abdi Adan	Head Section of the Hansard and secretary of CJJ&HR
27.	A/Rahman Jama Nur	Head section Media and Secretary of Internal Affairs & defense
28.	A/wahab Ahmed Mohamed	Secretary of Foreign Affairs Committees
29.	Sahal Guled Xadi	Head Section of Security and Secretary of Soc & Religion Affairs
30.	Amal Ahmed Iman	Secretary Of Archives Office
31.	Wacaysa Ali Ahmed	Head section Department of Planning
32.	Mohamed Mohamud Osmaan	Head Section Department of Planning.
33.	Mahad Omer Sa'eed	Head section of Plenary and Secretary Public Accounts Committees
34.	Khadra Suber Nux	Secretary
35.	Mohamed Hussein Eilmi	Secretary Hazard the office
36.	Mohamed Hassan Mohamed	Camera Man
37.	Sa'ed Jirde Haybe	Camera Man
38.	Ahmed Osman Farah	Head section of Protocol
39.	Dheg Adan Bile	Mechanics and Electricity
40.	Fadxiya Ali Hassan	Secretary of Protocol
41.	Guled Ahmed Jama	Supporter Electricity
42.	Mohamed Ibrahim Ismail	Secretary
43.	Ahmed Farah Bodhle	Secretary of the Protocol
44.	Abdikarim Aydiid Abokor	Secretary
45.	Mustafe Nur Farah	Secretary
46.	Cismaan Maxamed Axmed	Secretary
47.	C/risaaq Axmed Aadan	Secretary

C/risaaq Siciid Ayaanle

Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL.

Filename: 2014 Yearly Report
Directory: C:\Users\CAWAD\Documents
Template: C:\Users\CAWAD\AppData\Roaming\Microsoft\Templates\Normal.
dotm
Title:
Subject:
Author: CAWAD
Keywords:
Comments:
Creation Date: 12/01/2017 17:20:00
Change Number: 38
Last Saved On: 06/03/2017 23:15:00
Last Saved By: CAWAD
Total Editing Time: 280 Minutes
Last Printed On: 06/03/2017 23:16:00
As of Last Complete Printing
Number of Pages: 35
Number of Words: 8,674 (approx.)
Number of Characters: 49,447 (approx.)